



Kormeerida Bandhigga Tiknoolajiyada ee Magaalada Feebaraayo 27, 2019 6:00 p.m. - 8:00 p.m.

Bertha Knight Landes Room, 1st Floor City Hall
600 4th Avenue, Seattle, WA 98104

Nagulasoo biir bandhigga dadweynaha si fikir looga dhiibto dhawr kamid ah aaladaha tiknoolajiyada ee City surveillance:

Seattle City Light

- Binoculars
- Sensorlink Ampstik
- Sensorlink Cabiraha mitirka Gudbiyaha

Seattle Department of Transportation

(Waaxda Gaadiidka ee Seattle)

- Acyclica

Seattle Fire Department

(Waaxda Dab damiska ee Seattle)

- Adeeg Qaybinta Kumbuyutarka loo adeegsado

Seattle Police Department

(Waaxda Booliiska ee Seattle)

- Qalabka Duuba Wicitaanada 911
- Computer Aided Dispatch
- CopLogic

Nooguma imaan kartid miyaa si toos ah?

Booqo barta www.seattle.gov/privacy si aad fikirkaaga oonleen ahaan uga dhiibato
Surveillance and Privacy Program, Seattle IT, PO Box 94709, Seattle, WA 98124.

Mudada Fikrad Dhiibashadu furantahay waxay kabiliaabanaysaa

Feebaraayo 5 - Maars 5, 2019.

**Fadlan noogusoo gudbi ciwaankaan Surveillance@seattle.gov hadaad
ubaahantahay hooy laguusii qabto. Wixii macluumaaad dheeri ah,
booqo Seattle.gov/privacy.**

Xog aruurinada, waraaqaha lasaxixaayo iyo sawirada lagu qaado munaasabadaan waxaa loo aqoonsanayaa diiwaan bulsho waxaana suuragal ah in bulshada lagu dhix faafiyoo. Wixii macluumaaad dheeri ah kafiri Public Records Act (Sharciga Diiwaanada Bulshada) RCW Cutubkiisa 42.56 ama booqo Seattle.gov/privacy. Dhammaan fikradaha ladhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Saamaynta Qalabka Muraaqabada.

Qalabka Sheega Iskudarka Qulqulka Tamarta

Seattle City Light

Waa maxay tignooloojiyadu?

Kooxda Leexinta Qulqulka Tamarta (CDT) ayaa adeegsada saddex qalabka oo tignooloojiyada ah si ay u ogaadaan hadii korontada si sharci doro ah loo adeegsaday ayadoon lacagtii ladhiibin:

- (1) binocular-ka, heerka dhexe, ee naqshada ganacsiga ah;
- (2) Sensorlink Ampstik; iyo
- (3) Sensorlink Transformer Meter System (TMS)

Macluumaadka lagusoo aruuriyo aaladahaan waxaa loo adeegsan karaa cadaynta lagu ogaanaayo cadadka tamamarta korontada laleexsaday.



Binoculars



TMS



Sensorlink Ampstick

Maxaan u adeegsanaynaa qalabkaan casriga ah?

Qalabkaan baarista ah waxay usahalayaan City Light ilaalinta hufnaanta hanaanka qaybinta tamarta korontada, in ay go'aamiso inay jirto koronto laleexsaday, iyo in lacabiro cadadka tamarta laleexsaday si loosiyo maamulka cadadka qarashka ay tahay in lasoo celiyo. Sanadkii 2017, qiimaha korontada lasoo celiyay ayaa ahaa \$1.6 million ayadoo loo adeegsaday qalabkaan casriga ah. Tani waxay haddii kale ku ahaan lahayd Magaalada khasaare dhaqaale oo aad uwany.

Mudada ay furantahay dhiibashada fikradaha dadwaynaha ee kusaabsan qalabkaan wali way socotaa. Wuxuu fikradahaaga kudhiib kartaa barta [Seattle.gov/Privacy](#).

Dhamaan fikradaha ladhiibto waxaa lagu darayaa Warbixinta Saamaynta Muraaqabada oo kusaabsan qalabkaan waxaana loodirayaa gudigga shirkada.

Haddii aad doonayso inaad fikrad kadhiibato qalabkaan xili kabaxsan mudada fikradaha dadwaynaha loogu talagalay, fadlan si toos ah ugu gudbi Gugigga Magaalada.

Aruurinta Qarashka

Qalabka binoculars waxaa loo adeegsadaa in si rimoot ahaan ah loogu akhriyo mitirada korontada xisaabaha, mana soo aruuriyo macluumaadka. Labadaba aalad ee Sensorlink waxay soo aruurisaa macluumaadka cadadka korontada la isticmaalay, oo kucabiran kilowatt-saacadood, celceliska volts (awooda korontada), celceliska amps (qulqulka korontada), iyo xadiga isticmaalka, oo kucabiran kilowatt-saacadood xilgii kasta oo korontada loogu talagalay in la xisaabiyo.

Isticmaalka

Xubnaha kooxda lasocoshada leexsida tamarta waa shaqaalahi kaliye ee City Light oo adeegsada qalabkaan casriga ah, waxayna kaliya adeegsan karaan marka uu jiro tuhun ah in korontadalaleexsaday (tusaale marka qof daris ah soosheego, isticmaal qaldan ama inaan wax koronto ah guriga kusocon oo la arko markii shaqaalahi City Light samaynayaan kormeerka joogtada ah ee akhrinta mitirka korontada, in caadi loo arko mitir wax laga badalay, iwm.).

Difaacyada

Marka kiiska si rasmi ah loofuro, qalabkaan CDT ga ee casriga ah ayaa lagu hawlgiyaa ayadoo laraacaayo nambarka kiiska iyo baahida. Qalabka TMS, macluumaadka lasoo arursho waxaa loodiraa shirkada ayadoo la adeegsanaayo raadiye amaan ah oo leh borotokool iyo barnaamij gaar ah, oo leh software leh eray sireed.



City of Seattle

ACYCLICA

Qalabka Aruurinta Macluumaadka Taraafikada

Maxay tahay tiknaloojiyadu?

Qalabka Acyclica wuxuu qiyaasaa wakhtiyada safarka gaariga dhabta ah ee waddooyinka magaalada. Waxay soo qabtaan qalabka baabuurga ee leh-Wi-Fi (sida telefoonada casriga ah) ee u safra inta u dhaxaysa goobo baddan. Waa qalab dareemayaal yar-yar oo lagu xiro qalabka waddada SDOT, sida sanduukhyada xakameeya calaamada taraafikada.

Sabab aynu u isticmaalno tiknaloojiyada?

SDOT waxay u isticmaashaa tiknaloojiyadaan si ay ugu xadido wakhtiga safarka loogu socdo waddooyinka magaalada. Ayada oo ay isticmaalayo soo qabashada cinwaanka gaarka ah, Acyclica waxay soo qabanaysaa farqiga u dhaxeeya dhaqaqa gaariga marka uu soconayo, istaago, kana tago is-goyska. Waxaynu u isticmaalnaa macluumaadkan si aynu ugu wanaajijo hawlahaa taraafikada ee shabakada waddada Seattle. Sidoo kale waxay nagu caawinaysaa in aynu wanaajino ammaanka iyo dhaqaqa dhammaan dadka safarka ah.

Aruurin

Acyclica waxay aruurinaysaa aqoonsadaha telefoonka gaarka ah, ee lagu magacaabo cinwaanka MAC, ayada oo ay isticmaalayo qalab dareeme ah oo lagu xiro gudaha khaanadaha taraafikada xakameeya kadibna waxay si dhakhso ah sir uga dhigaysaa macluumaadka. Acyclica kadibna waxay qaybinaysaa ama isku daraysaa oona baabi'inaysaa macluumaadka, ayada oo ka dhigaysa mid aanan la aqoonganin ayada oo u samaynaysa lambaro iyo xarfo, kadibna ugu daraysa si kala sooc la'aan ah xarfo dheeraad ah.

Isticmaalka

SDOT waxay isticmaashaa macluumaadka la isku daray midaas oo uu aruuriyay qalabka Acyclica si loogu sameeyo qiimeyn socodka taraafikada iyo xiranka, wakhtiga calaamada saxda ah, iyo in lala wadaago dadka socdaalka ah macluumaadka ku saabsan dib u dhacyada suurtogalka ah.

Ilaalinta

Acyclica waxay marwalba qarisaa cinwaanada gaarka ah ee ay aruuriso, hawshaana ma ahan mid laga noqon karo. Macluumaadka aqoonsiga shakhsiyeed kuwaas oo loo isticmaali karo in lagu aqoonsado qofka, lagula xiriilo, ama lagu oggaado meesha uu qof joogo, ma ahan mid ay qabanayso SDOT, iibiyaha, ama dadweynaha.



Muddada faalada furan ee loogu talogalay tiknaloojiyadan waa mid **hadda socota**. Waxaad keeni kartaa faalooyinka dhinaca Seattle.gov/ Privacy.

Dhammaan faalooyinka waxaa lagu dari doonaa Warbixinta Saamaynta Ilaalada ku saabsan tiknaloojiyadan waxaana la siinaya Guddiga.

Haddii aad jeceshahay in aad bixisid ficol celin ka baxsan muddada faalada furan, fadlan si toos ah ugu soo dir dhinaca Guddiga Magaalada.



Seattle
Department of
Transportation

Computer Aided Dispatch (CAD)

Seattle Fire Department

Waa maxay tignoolajiyada?

Seattle Fire Department (SFD), Waaxda Dabka damiska ee Seattle) waxay u adeegsataa qalabka Computer Aided Dispatch (CAD, Hawlagalka Kumbuyutarka Loo adeegsado) bixinta iyo maaraynta jawaab celinta boqolaal kun oo wicitaan oo kasoo gaara Magaalada Seattle sanad kasta. CAD waa qalab software ah kaasoo gacan kagaysta maaraynta jawaabaha saxda ah ee lasiyo wicitaanada 911 ayadoo laga raacaayo dhibka lasoo sheegay iyo goobta qofka wicitaanka soodiray ee caawimaada ubaahan uu joogo.



Muddada ay furanyihiin fikradaha ay bulshadu kadhiibanayaan qalabkaan casriga ah hadda way socotaa. Wuxaa fikradahaaga kusoo gudbin kartaa [Seattle.gov/Privacy](#).

Dhamaan fikradaha ladhiibto waxaa lagusoo dari doonaa Warbixinta Saamaynta Muraaqabada ee kusaabsan qalabkaan casriga ah waxaana loogudbinayaa Gudigga.

Haddii aad doonayso inaad fikradahaaga soodirto xili kabaxsan mudada ay fikrad dhiibashadu furantahay, fadlan si toos ah ugu dir Gudigga Magaalada.

Maxaan u adeegsanaa qalabka casriga ah?

Marka ay jirto xaalad degdeg ah, go'aan gaaris degdeg ah oo waxtarleh oo ay gaaraan saraakiisha hawlgalinta iyo shaqaalaha gurmadka degdega ah ayaa ah kuwo kaladuwaa marka laga hadlaayo nolol iyo geeri. CAD waa qalab usahlaaya saraakiisha hawlgalinta iyo shaqaalaha gurmadka degdega ah inay si hufan oo waxtarleh uga shaqeeyaan qiimaynta xaaladaha degdega ah iyo shilalka si ay ugo'aanshaan jawaabaha iyo adeegyada kuhaboon xaaladaas.

Aruurinta

CAD wuxuu macluumaad kasoo aruuriyaa dadka xarunta soowacaaya si qaabka uguhaboon looga jawaabo xaaladaha degdega ah, oo badanaa ay kujiraan magaca soo wacaha, nambarkiisa taleefanka, ciwaanka gurigga uu qofku wicitaanka kasoo diraayo, xaaladaha caafimaadka, iyo macluumaadka kale ee shaqsyan qofka loogu aqoonsan karo. Inta badan macluumaadkaan waxaa si iskood ah usheega dadka xarunta soowacaaya. Macluumaadka qaarkiis ayaa lakaydin karaa si loogu adeegsado mustaqbalka marjac ahaan markay jiraan xaalado degdeg ah ama ujeedooyin laxariira xaqijinta tayada adeegga.

Isticmaalka

Qalabka Seattle's Computer Aided Dispatch (CAD) waxaa si gaar ah loogu sameeyay shaqaalaha gurmadka degdega ah si loomaareeyo qabashada wicitaanada xaaladaha degdega ah iyo kuwa aan degdega ahayn iyo dirista hawlgalada. Qalabkaan wuxuu aruuriyaa macluumaadka wicitaan kasta si iskunidaamsan wuxuuna waqtiga saxda ah ugu gudbiyya shaqaalaha si ay ugaaraan go'aano hufan oo waxtar leh markay kafalcelinayaan xaaladaha degdega ah.

Ilaalinta

Shaqaalaha unifoomka qaba ee Seattle Fire Department ee kashaqeeya gurmadka degdega ah ayaa kulug leh adeegsiga sistemka CAD. Shaqaalahaan waxaa kamid ah laakiin aan kukoobnayn saraakiisha hawlgalinta, waaxda hawlagalada, iyo shaqaalaha hawlgalada socda. Dhamaan galitaanka macluumaadka kujira CAD waa mid kusalaysan darajada qofka waxaana lacusboonaysiyyaa maalin kasta si loo xaqijiyo in kaliya shaqaalaha loogu talagalay ay galaan macluumaadka. Kaliya shaqaalaha SFD ayaa gali kara qaab dhismeedka muhiimka ah iyo macluumaadka shaqsiga ah ee kujira qalabka CAD.




City of Seattle

Diiwaanka Macluumaadka 911

Seattle Police Department (SPD)

Waa maxay tignooloojiyadu?

Diiwaanka Macluumaadka 911 waa qalab si ootomaatig ah udiwaangasha dhamaan wicitaanada taleefanka ee ay samayo waaxda arimaha degdega ah ee Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska ee Seattle) Xarunta 9-1-1 ee Waaxda Booliska Seattle iyo sidoo kale dhamaan raadiyaasha taraafikada ee ay isdhaafsadaan saraakiisha shaqada kujira iyo saraakiisha roondada ee SPD.



Maxaan u isticmaaleynaa qalabka casriga ah?

Diiwaanka Macluumaadka 911 wuxuu kataageeraa shaqada Xarumaha 9-1-1 ka bixinta howlgal tayo sare leh, joogto ah, oo xirfadysan iyo adeegyada qabashada wicitaanada. Diiwaanadaan lasameeyo ayaa bixinaaya cadayn qeexan, hufan, oo tayo leh ayagoo duubaaya xiliga saxda ah ee codadka la isdhaafsanaayo oo ay isdhaafsanayaan dadka qabta wicitaanada 9-1-1 iyo dadka soowacaaya, iyo dhamaan wicitaanada raadiyaha ee udhaxeeya saraakiisha roondada iyo kuwa shaqada kujira.

Waqtiga ay furanyihiin fikradaha dadwaynaha ee ku aadan qalabkaan ayaa hada socda. Waxaad fikradahaaga kusoo gudbin kartaa [Seattle.gov/Privacy](#).

Faallooyinka dhamaan waxaa lagu dari doonaa Warbixinta Saameynta Dabagalka ee farsamadaan waxaana loo gudbinayaa Golaha.

Haddii aad jeelaan lahayd inaad bixiso war celin xili ka baxsan xiliga u furanyahay faallooyinka, fadlan si toos ugu dir Golaha Magaalada.

Uruurinta

Dhamaan macluumaadka lasoo aruuriyo waxaa baxsha qofka soowacaaya 9-1-1 ama waxaa laga qaadaa macluumaadka saraakiisha kajawaaba dalabka soowaca ama ciidanka hawlgalka. Macluumaadka uu soo aruuriyo systemka wax duuba waxaa kujira codadka laga qabto wicitaanka, xiliga biloowga iyo dhamaadka wicitaanada laduubaayo, goobta shaqada ee shaqsiga kajawaabaaya wicitaanka, mudada uu wicitaanku socdo, iyo nambarka taleefanka iyo/ama kanaalada raadiyaha loo adeegsaday in agu waco 9-1-1.

Isticmaalka

Codadka laduubo waxaa si joogto ah loogu adeegsadaa dacwooyinka danbiyada waxaana si joogto ah loogu isticmaala Xarunta 9-1-1 ujeedooyin laxariira tababar iyo xakamaynta tayada shaqada. Kudhawaad ilaa 5000 oo codad laduubay ah ayaa loogudbiyaa Seattle Law Department (Waaxda Sharciga ee Seattle) sanad kasta si loogu taageero dacwooyinka sharci ee socda.

Ilaalinta

Kaliya shaqaalaha fasaxa uhaysta oo katirsan SPD ayaa isticmaali kara systemka ayagoo kugalaaya macluumaad eray sireedr leh. Dhamaan shaqalaaha adeeggsada systemka waa kuwo shahaado kahaysta Criminal Justice Information Services (CJIS, Adeegyada Macluumaadka Caddaaladda Dembiyada) Macluumaadka shaqooyinka systemka iyo ficiilada dadka isticmaala systemkaba waa lakaydiyaa sababo laxariira isxisaabtan, iyo in laga ilaalsho in sifo sharci daro ah lagu galo macluuaadka kaydka kujira.



City of Seattle

Computer Aided Dispatch (CAD)

Seattle Police Department (SPD)

Waa maxay tignoolooyiyadu?

Computer Aided Dispatch (CAD, Hawlgal Kumbuyuutarku taageeraayo) waa software lagu dhisay Xarunta 9-1-1, iyo qalab kujira macluumaadka moobilka kumbuyuutarka (MDCs) kaasoo kuxiran gawaarida ciidanka hawlgalka iyo taleefanada saraakiisha shaqada kujira. Marka qof waco 911, qofka wicitaanka qabanaaya ayaa diiwaan galinaaya systemka CAD, kadibna hawlgaliye ayaa laxariiraaya saraakiisha ciidanka ee aaga jooga si ay dalabka qofka soowacay uga falceliyaan.

CAD wuxuu kacaawinayaay shaqaalaha xarunta 9-1-1 helitaanka macluumaadka soowacaha, wuxuuna usheegayaay goobta uu joogo sarkaalka hawlgalka kujira, taasoo usahlaysa Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska ee Seattle) inay hawlgaliyaan saraakiisha roondada ah ee ugu dhaw goobta. Systemka ayaa sidoo kale macluumaad xiliga saxda ah soo baxa kabixinaaya jawaabta SPD ay kabixiyaan wicitaanada loosoo diro adeegga booliska.

Maxaan u isticmaaleynaa qalabka casriga ah?

CAD wuxuu ufududaynayaay SPD inay buuxiso shaqadeeda kajawaab celinta si degdeg ah dhamaan codsiyada soogaara adeegyada booliska; inay bixiyaan hawlgalin xirfadysan, ogaysiin, iyo adeegyada isgaarsiinta ee Waaxda; iyo inay macluumaad bixiso kaasoo usahlaaya SPD inay ogaadaan goobta saraakiisha ciidanku joogaan si waxtar leh ayadoo lasoo koobaayo waqtiyada jawaab celintu qaadanayo.

Uruurinta


Macluumadka lagasho CAD waxaa kujira macluumadka ay baxshaan dadka soowaca 9-1-1, iyo sidoo kale maclumaadka soowacaha ee ay bixiso shirkada taleefanka iskaleh, sida nambarka taleefanka, goobta qofka soowacaha ah, iyo magaca qofka. Macluumadka ku aadan jawaabta boolisku kabaxsho wicitaan waxaa lagashaa systemka CAD waxaana gasha hawlgaliyaasha iyo saraakiisha SPD ee wicitaanka kafalceinaaya tagaayana dhacdooyinka adeegga.

Isticmaalka

Seattle Police 9-1-1 Center, oo shaqaysa 24 saac maalintii, 365 maalmood sanadkii, waxaa soogaara kudhawaad 900,000 wicitaan sanadkasta taasoo keenta abuurista kudhawaad 250,000 oo dhacdooyinka CAD soogala ah sanad kasta. Kudhawaad 135,000 oo dhacdooyinka CAD oo dheeri ah ayay kahawlgalaan saraakiisha boolisku inta lagu jiro shaqooyinka caadiga ah ee booliska hawlgalada kujira sanad kasta.

Ilaalinta

Kaliya shaqaalaha fasaxa uhaysta oo katirsan SPD ayaa isticmaali kara systemka ayagoo kugalaaya macluumaad eray sireedka leh. Dhamaan shaqalaaha adeegsada systemka waa kuwo shahaado kahaysta Criminal Justice Information Services (CJIS, Adeegyada Macluumaadka Caddaaladda Dembiyada). Macluumadka shaqooyinka systemka iyo ficiilada dadka isticmaala systemkaba waa lakaydiyya sababo laxariira isxisaabtan, iyo in laga ilaalsho in sifo sharci daro ah lagu galo macluumadka kaydka kujira. Dhamaan macluumadka kabaxaaya khadka SPD waa mid xafidan.



Waqtiga ay furanyihii fikradaha dadwaynaha ee ku aadan qalabkaan ayaa hada socda. Wuxaad fikradahaaga kusoo gudbin kartaa [Seattle.gov/Privacy](#).

Faallooyinka dhamaan waxaa lagu dari doonaa Surveillance Impact Report (Warbixinta Saameynta Dabagalka) ee farsamadan waxaana loo gudbinayaa Golaha.

Haddii aad jeelaan lahayd inaad bixiso war celin xili ka baxsan xiliga u furan faalloovinka, fadlan si toos ugu dir Golaha Magaalada.

CopLogic

Seattle Police Department (SPD)

Waa maxay Tignoolojoiyda?

CopLogic waa qalab software ah oo lagu diro warbixinada danbiyada kaasoo ufududayaaya xubnaha dadwaynaha inay warbixino booliska ugu gudbiyaan qaab oonlen ah ayagoo adeegsanaaya hanaan webseet kushaqeeyaa.

Wuxuu qalabku ufududaynaya isticmaalaha, kayd shaqsi ah ama tafaariiq ah midkood, si uu faldanbiyeedyada ugu gudbiyo booliska markuu doono. Istimmaalaha ayaa wali heli kara faa'iidooyinka soo sheegida dhacdo, xataa markaan sarkaal booliska katirsani ubaahnayn inuu goobta danbiga lagu sheegay tago.

Maxaan u isticmaaleynaa

qalabka casriga ah?

CopLogic wuxuu faaiido uyahay labadaba bulshada iyo Seattle Police Department (SPD), Waaxda Booliska ee Seattle) asagoo bilaash kadhiqaaya adeegyada xarunta 9-1-1, meeshana kasaaraaya saraakiisha wareegta si ay qaab toos ah ugu tagaan qaar kamid ah meelaha lagasoo sheego fal danbiyedyada, wuxuuna siinayaa xubnaha bulshada qaab amaan ah, kuhaboon, oo waqtiga saxda ah kaasoo ay booliska waxbixin

kusiin karaan. Xubnaha bulshadu waxay helayaan koobi lacag la'an ah oo warbixinooda booliska ah markay warbixinta kudiraan systemka CopLogic. CopLogic wuxuu badbaadiyya 20,000 saacadood oo saraakiisha boolisku wareegi lahaayeen sanad kasta, taasoo waqtii firaqo badan usiinaysa saraakiisha inay kajawaabaan xaaladaha daran wuxuuna kubadbaadiyya waaxda lacag dhan \$1,000,000 sanad kasta.

Uruurinta

Dhamaan macluumaadka lagusoo aruursho qalabka CopLogic waxaa soo gudbiya dhibanaha faldanbiyeedka, kaasoo warbixinada keenaaya. Shaqsiyadka waxaa laga doonayaa inay macluumaadka muhiimka ah si ay warbixinooda ugu diraan oonleen. Majiraan macluumaad ama warbixin lagasoo qaadaayo meel kale.

Isticmaalka

Marka warbixinta lagudbiyo kadib, xubnaha SPD da ee interneetka iyo Waaxda Warbixinada ee Taleefanada ayaa galaaya barta webseetka CopLogic kadibna arkaaya warbixinada. Warbixinada waxaa baaraaya sarkaal waxaana loogudbinayaa Systemka Maarynta Diiwaanada ee SPD. Saraakiisha SPD ayaa intaas kadib soocnaaya warbixinta markay muhiim tahay.

Ilaalinta

Kaliya shaqaalaha SPD ee fasaxa uhaysta ayaa gali kara macluumaadka ay soo gubiyan shaqsiyadka kunasoo diraan qalabka oonleenka ah. Shaqaalaha SPD ayaa kaliya gali kara macluumaadka CopLogic marka loofasaxo lana siyo macluumaadka galitaanka ee systemka qaaska u ah. Dhamaan shaqadu waa mid qoran xisaab xirna leh. Macluumaadka si remuut ah ayaa loo kaydiyaa waxaana maamula Lexis Nexis taasoo, "...taasoo adeegsata nidaamyo kaladuwaa oo dhanka maamulka ah, qalab ahaan iyo farsama ahaanba si ay uga caawiyaan dhawrista macluumaadkaaga shaqsiga ah."

The screenshot shows the Seattle Police Department's "Online Crime Reporting" page. At the top, there's a navigation bar with links for "Need Help?", "Information & Data", "Community Policing", and "About Us". Below the navigation, there's a sidebar with links for "Online Reporting", "Stolen Vehicle", "ID Theft", "Wage Theft", and "Collision". The main content area is titled "Online Crime Reporting" and contains a section titled "File a Report" which states that crimes can be filed online without an in-person police response. It lists criteria for filing online, such as not being an emergency situation or occurring within Seattle city limits. A "Make a Report" button is present. To the right, there's a sidebar titled "What Crimes Can I report?" listing various crime types like Property Destruction, Graffiti, Car Break Ins, Theft Auto Accessories, Theft, Shoplifting, Drug Activity, Harassing Phone Calls, Credit Card Fraud, Wage Theft, Identity Theft, and Lost Property. There's also a "Contacts" section with a non-emergency number and an emergencies call center.

Waqtiga ay furanyihiiin fikradaha dadwaynaha ee ku aadan qalabkaan ayaa hada socda. Wuxaad fikradahaaga kusoo gudbin kartaa **Seattle.gov/Privacy**.

Faallooyinka dhamaan waxaa lagu dari doonaa Warbixinta Saameynta Dabagalka ee farsamadan waxaana loo gudbinayaa Golaha.

Haddii aad jeelaan lahayd inaad bixiso war celin xili ka baxsan xiliga u furan faallooyinka, fadlan si toos ugu dir Golaha Magaalada.